# Duruusta Tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa

**Qormadii 6aad**

**Qalinkii Cabdirisaaq Caqli. ( e-mail: cabdicaqli@hotmail.com.)**

Ka hor intaynaan falanqaynin qaabkii uu Sheikh Madar, Alle Ha u Naxariistee (AHN) u gudogalay marxaladii labaad ee barashada cilmiga tasawufka, waxaa lagama maarmaan ah in aynu sharax kooban ka bixinno micnaha ereyga tasawuf, xilliga uu magacani soo baxay, iyo waxa loola jeedo tasawufka. Habab kala duwan ayaa loo sharraxaa erayga tasawuf halka uu ka soo unkamay iyo sababta cilmigani magaca loogu bixiyayba. Mar waxaa lagu tilmaamaa in erygu ka soo jeedo erayga suuf oo loo nisbaynayo in culimadii bilowday tasawufku ay xidhan jireen dhar suuf ah. Mar kalena waxaa lagu tilmaamaa in uu erayga laga soo xigtay eray af Griig ah, ee **sophia** micnaheeduna yahay xikmad. Taaso cilmigani loo nisbaynayo inuu xikmad iyo xaqiiqo dhab ah ku qotomo oo dadka barta ee si sax ah ugu dhaqmaa ay noqdaan dad xikmad leh. Waxaa kale oo lagu sheegaa in eraygan uu ka yimid sharraxaad uu Cali Bin Abii Daalib (Alle Ha u Naxariistee ) ka bixiyay Alle cabsiga sifooyinka u horseeda oo ah 12 sifo. Taasoo uu u qaybiyay afar xaraf, oo uu mid walba saddex sifo u yeelay. ( T,S,W,F); (**T**, Tark- ka reebanaan- Tawbeh- Toobad keen- iyo Tuqa- Alle cabsi ;) (**S**, Sabr- sabir- ; Sidq rumayn- iyo Safa- saafinimo;) (**W**, Wud- jacayl-; Werd- werdi iyo Wafa'a- oofin-;) ( **F**, Fard- kelinimo- ; Faqr- saboolnimo-; Fanaa- u go'id-.).

Haddii aynu dabogalno xilliga uu tasawufku soo baxay, waxaa inoo muuqanaya in tiiyoo aanay weli u buuxsamin boqol sano mudadii diinta Islaamku jirtay, ay muslimiintu qabsadeen boqortooyooyinkii ugu waaweynaa ee ka jiray Faaris iyo Masar. Taasoo muslimiintii carabta ahaa ay la kulmeen nolol aad uga duwan tii ay ku soo barbaareen ee ka jirtay Jasiirada carabta xilligii Islaamku hanaqaaday. Waxayna noloshani cusubi keentay horumar dhaqaale oo aad u sareeya, laakiin se wata dhibaatooyinkiisa raaxaysiga fasahaadka leh. Waxayna culimadii muslimiinta ee Alle cabsigu ku xooganaa ka baqdeen in nuxurkii Islaamku ku dhex milmo fasahaadkan ay dhex muquurteen Carabtii isku xilsaartay in ay diinta Islaamka fidiso. Si ay uga fogaadaan khataraha raaxaysigan fasahaadka wata, ayey culimada qaarkood doorbideen in noloshii adkayd ee lagu jiray markii Islaamku bilaabmay ay dib ugu noqdaan iyagoo ka fogaanaya raaxaysiga maadiga ah ee noloshan raaxada cusub ee la soo dhex galay wadato. Taasoo ay xoojiyeen sidii hawada naftooda ay ula diriri lahaayeen intii karaankooda ah, iyagoo joogtaynaya soomitaan badan, dikri joogto ah, hurdo yaraan iyo cibaado aan kala go' lahayn.

Culimaadaasi ugu horreysay ayaa lagu tilmaamaa kuwa dhidibadii ugu horreeyay ee tasawufka taageen. Kadibna waxaa abuurmay dariiqooyin kala duwan oo mid waliba hab gaar ah ku xakamaynayso hawada nafta, kuna sifaynayso qalbiga, tiiyoo werdiyo kala duwan oo xasuusta Ilaahay ah la laasiminayo akhrigooda. Tasawufkiina wuxuu noqday habka uu qofku ku xakamaynayo hawada naftiisa, kuna nadiifinayo qalbigiisa. Taasoo ah in qalbigiisa uu ka buuxinayo dikriga iyo xasuusta Ilaahay, si uu Qalbiga ugu soo celiyo suuradiisii cadayd ee uu ku soo dhashay, ugana buuxiyo xasuusta Ilaahay, ka dib markii denbiyadii iyo gefafkii uu gelayey madoobeeyeen.

Mudadii u dhaxaysay qarnigii 3aad iyo Qarnigii 7aad ee Hijrada ayay dariiqooyinka tasawufku aad u kobceen, xoogna ugu fideen dalalka muslimiinta, Islaamkana gaadhsiiyeen dalal badan oo aan hore muslin u ahayn. Waxaana la rumaysanyahay in Islaamka ay soo gaadhsiiyeen kuna fidiyeen geeska Afrika qaar ka mid ah suufiyadaasi. Dariiqada rasmiga ah ee magaalada Harar waxay ahayd Qaadiriyada, ilaa qarnigii 15aad markii uu Sheikh Abubakar, Caydaruus Al-cadani (1447-1508), uu ka hirgeliyay dariiqadani.

Waxbarashada magaalada Harar way ka duwanayd hababka jamaacadaha iyo dariiqooyinku u hawlgalayeen marka ay tasawufka barayeen dadweynaha. Waayo Harar waxay ahayd dugsigii ugu sareeyay ee soo saarayey culimada jamaacadahaasi madax ka noqonaya. Markii Sheikh Madar (AHN), u soo gudbay marxaladii barashada cilmiga tasawufka, wuxuu ahaa Sheikh cilmiga shariicada si qotodheer u gudagalay, una soo bartay mudadii uu Harar wax ka baranayey. Waxaana laynoo soo tebiyay inuu ugu da' yaraa ardaydii cilmiga tasawufka ay wada baranayeen ee uu la dhiganayey.

In kasta oo uu muddo dheer baranayey cilmiga shariicada, una yeeshay cilmigaasi aqoon qotodheer, waxay Sheikh Madar ugu muuqatay in barashada tasawufku lagama maarmaan u tahay. Wayo waa cilmiga lagu xakamaynayo hawada nafta, laguna sifaynayo qalbiga si xasuusta Ilaahay u noqoto mid ka buuxda qalbigiisa had iyo jeer. Kamay qarsoonayn Sheikh Madar (AHN), in barashada labada cilmiba ku qaadan doonto sanado aad u farabadan. Waxaana lagu qiyaasaa sanadihii uu Harar diinta Islaamka ka baranayey muddo ka badan 26 sano.

Waa mid taariikhda Islaamku innoga marag kacayso, in culimo aad u yari dhammaystirtay barashada labada cilmiba, oo ay iswaafajisay shariicada iyo tasawufka. Culimadaasi labada cilmiba iswaafajisay waxaa ka mid ahaa Sheikh Cabdilqaadir Al-Jiilaani iyo Imaam Muhammed Al-Gaazaali. Imaam Ghazaali markii ka hor intaanu baran

tasawufka wuxuu ka mid ahaa culimada ugu aqoonta badan ee dhiga  cilmiga shariicada xilligiisii. Ka dib markii uu bartay cilmiga tasawufka kana gudbay marxaladihii looga baahnaa oo idil, ayuu qoraal ka bixiyay siday naftiisu ahayd markii uu shariicada oo keliya yiqiin. Taasoo oo inoo sheegay in naftiisa ay ka buuxday iscajabin, magacjacayl, iyo istus markii uu duruusta dhigayey. Wuxuuna inoo sheegay in naftiisu jeclaysan jirtay marka ay dad badani u soo ururaan inay dhegaystaan. Taaso meesha ka saaraysa in Ilaahay dartii oo keliya uu diinta u dhigayey. Waxaa kale oo uu qoraaladiisa inoogu sheegay sida ay hawada naftiisu uga buuxday qalbigiisa ka hor intaanu gelin barashada tasawufka.

Sida la ogsoonyahay marka la baranayo tasawufka waxaa lagama maarmaan ah in muriidka  jidkani tasawufka marayaa haysto Sheikh uu ku kalsoon yahay oo hore u soo maray jidka tasawufka kana gudbay marxaladihii loo baahnaa oo ka gaadhay maqaam weyn oo uu ardaydiisa ku hagi karo. Sheikh Madar waxaa u bilaabay barashada iyo hagista jidka tasawufka, Kabiir Cumar oo ahaa macalimiinta ugu waaweyn ee Harar wax ka dhigta. Kabiir Cumarna wuxuu hore uga aflaxay oo jidka tasawufka u dhigay Sheikh Hashim Cabdilcasiis Al-Harari. Kitaabka uu qoray Haashim Al-Harari ee lagu magacaabo  Al Futuuxaat Al- Raxmaaniya ayaa inoo iftiimin kara habka ay culimada tasawufka ee Harar raaci jirtay. Wuxuu kitaabkaasi inoo muujinayaa in uu Haashim Al-Harari sharraxayo fadliga badan ee uu leeyahay Salliga Nebigu ( NNKH), kuna guubaabinayaa in aad loo badsado salliga Nebiga (NNKH).

Marxaldani tasawufka ee uu jidkeeda soo maray Sheikh Madar (AHN), waxay ahayd mid u baahan qof karti iyo sabir leh. Waayo bilowga horeba wuxuu Sheekhu ardayda uu jidkani marinayo siin jiray werdi u baahan in muddo badan lagu celceliyo. Sida la ogsoonyahay waxay nafta baniiaadmigu jeceshahay inay ku dhex jirto waxay soo caadaysatay ee ay hore u taaqaannay. Werdiga lagu celcelinayo, iyo dikriga faraha badanina waxaa looga jeedaa si qofku u caadaysto xasuusta Ilaahay oo qalbigiisu u jeclaysto dikriga Ilaahay oo keliya. Ku celcelinta werdigu muddo dheer oo gaadhaysa saacado badan, waa mid ku adag nafta qof kasta bilowga hore. Waana mid uu samayn karo uun qof leh karti iyo sabir xooggani. Sida la ogsoonyahay, wax kasta oo la bilaabayo barashadiisa, waxaa ugu adag marxaladda ugu horreysa.

Siday inoo muujinayaan qoraalada culimada marxaladaasi martay, tartiib tartiib ayuu qalbigu ula qabsadaa ku cel celinta werdiga. Markaa laga joojin waayo, wuxuu dikrigii lagu celcelinayay noqdaan mid qalbigu jeclaysto oo sii macaansada inuu sii wado. Kadibna qalbiga ayaa si joogta ah u qabsada dikriga Ilaahay oo aan sii daynba. Qofka heerkaasi gaadhaana wuxuu noqdaa qof had iyo jeer ku jira xasuusta Ilaahay oo aad ugu dhow. Qalbigii hore u madoobaana wuxuu u bedelmaa mid aad loo sifeeyay una soo noqotay cadaantiisii hore ee ay denbiyadii hore u modoobeeyeen. Waxaana dabagalka

taariikhdii Sheikh Madar(AHN) ee Harar inoo muujinaysaa inuu ka wada gudbay marxaladihii maritaanka jidkani looga baahnaa oo idil.

La soco salaasada danbe.